



## **Warbixinta**

**Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 20<sup>aad</sup>**

*23 Dec -19 Feb 2013*

*April 2013*

**Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.**

**Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 20<sup>aad</sup>**

*Mudanayaal*

Si aad hawlaha u qorshaysan **kal-fadhiga 21<sup>aad</sup>** ee Golaha Wakiilada u dardar galino una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanyna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halka idiinku soo gudbinayaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 20<sup>aad</sup> oo dhamaystiran si aad u xasuusataan.

**Ajandaha Kalfadhiga 20<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada.**

**25/12/2012**

1. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda Golaha Wakiilada
2. Xogogal u noqoshada Xaalada Dalka
3. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

<b>No</b>	<b>Magaca Xeerka</b>	<b>Marxalada aa u marayo</b>	<b>Cida Gacanta ku haysa</b>
1.	Miisaaniyadda Qaranka 2013	Wasaaradda Maaliyada	Wasaaradda Maaliyadda
2.	Waxkabadalka Xeerka Qareenada	Laga dooday	Xoghayaha
3.	Xeerka Booliska	Qabyo Qoraal	Gudidda Arrimaha Gudaha
4.	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo ku-xigeenka	Qabyo Qoraal	Gudidda Dhaqaalaha
5.	Xeerka ka Ganacsiga Hawlaha Banka	Akhriska 1aad	Gudidda Dhaqaalaha
6.	Xisaab-xidhka Dawladda 2008,2009,2010	Lagu celiyey Hantidhowrk a Guud	Hantidhawraha Guud ee Qaranka
7.	Xeerka Statistics law	Qabyo Qoraal	Gudidda Arrimaha Dibadda

4. Uyeedhista Masuuliyiinta Qaranka
5. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
6. Xeeraka ka soo noqda Golaha Guurtida
7. Iyo Wixii kale ee soo kordha

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 20<sup>aad</sup>**

## **1. Kal-fadhigii 20<sup>aad</sup>**

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	20 <sup>aad</sup>	23/12/2012	19/02/2013

Kal-fadhigan oo Golahu qabtey hawlo oo muhiim ah sida ansixintii Masuuliyiinta Qaranka 2013ka, Ansixinta 4 Xeer iyo Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka, waxaan halkan idiinku soo Gudbinaynaa dhamaan Waxqabadkii Gole weynaha, Shir-gudoonka iyo Gudiyada Golahaba oo kala ahaa sidan soo socota.

## **2.**

## **Xeerarka Goluhu ka doodey:-**

No	Magaca Xeerka	Watkhtiga laga doodey
1.	Xeerka Booliiska	
2.	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Hore	
3.	Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada	
4.	Xeerka Statisticska	



## **3. Xeerarka Goluhu Ansixiyey**

No	Xeerka	Taariikhda	Halka Loo gudbiyay
1.	Xeerka Takaaliita Amniga Madaarada		Madaxweynaha
2.	Xeerka Statisticska		Golaha Guurtida
3.	Xeerka asaaska Komishanka Maamulwanaaga		Madaxweynaha
4.	Xeerka Waddo-Marista Gaaddiidka		Madaxweynaha

#### **4. Ansixintii Miisaaniyada Qaranka ee 2013ka**

Goluhu wuxuu ansixiyey 30/12/2012 Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2013 iyo Lifaaqyada ku lamaan, Miisaaniyada oo Wasaarada Maaliyadu soo Gudbissey 23/12/2012, Miisaaniyadan oo ka koobneyd 750,000,000,000 waxaa ka muuqdey korodh aad u badan ismarkaana waxay noqotey Miisaaniyadii ugu horeysay ee Xiligii sharciga ahay Golaha Ku timi, Wasiirka Wasarada Maaliyada **Md. C/caziiz Maxamed Samaale** iyo Saraakiisha Wasaaradaasi Warbixin ka siiyeen Golaha su'aalana laga weyddiyay Golaha.

Isla markaana sida sharciga ah kulamo dhowra kawada yeesheen Guddida Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Miisaaniyad iyo Wasaarada Maaliyadu, Guddiduna Warbixin ka siisey Golaha, intaa ka dib Goluhu Wuxuu 30/12/2012 Cod aqlabiyada ku ansixiyay Miisaaniyada Qaranka iyo Lifaaqyadeed ee Sanadka 2013ka.

#### **5. Masuuliyiinta Goluhu Qaran ee Goluhu Ansixiyey**



<b>No.</b>	<b>Magaca Masuulka</b>	<b>Xilka loo Ansixiyey</b>
1.	Md. Saleeban Ciise Axmed (xagla-tosiye)	W.Wasaarada Dib-udejinta
2.	Md. C/salaam Maxamed Xasan	W.ku-xigeenka Wasaarada Macdanta, Biyaha iyo Tamarta

#### **6. Masuuliyiinta Qaran ee Golaha Warbixino siiyey**

<b>No</b>	<b>Masuulka</b>	<b>Xilka</b>
1.	Md, C/caziiz Maxamed Samaale	W. Wasaarada Maaliyada
2.	Md. Maxamuud Xaashi Cabdi	W. Wasaarada Duulista iyo Hawada
3.	Md. Sacad Cali Shire	W. Wasaarada Qorsheynta
4.	Md. Maxamud Dheere	Hantidhowraha Guud ee Qaranka



## **7. Xeerarka Guddiyadu Hayaan**

No.	Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan
•	<b>Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada</b>
•	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Midaynta Cashuuraha</li> <li>• Xeerka Caymiska Qaranka</li> <li>• Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency</li> <li>• Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka</li> </ul>
•	<b>Guddiga Garsoorka, xuquuqal insaanka iyo Dastuurka</b>
•	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud.</li> <li>• Xeerka Maxaabiista</li> <li>• Xeerka Gudidda Aasaaska Komishanka Dib u-habeynta shuruucda</li> </ul>
•	<b>Guddiga Joogtada iyo Anshaxa</b>
•	
•	<b>Guddiga Arimaha Bulshada iyo Diinta</b>
•	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose</li> <li>• Xeerka Saxaafada</li> <li>• Xeerka Ciyaaraha</li> </ul>
•	<b>Guddiga Arimaha Gudaha, difaaca Iyo nabadgalyada Guud</b>
•	
•	<b>Guddiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah</b>

<b>7.</b>	<b>Guddiga khayraadka dabiiciga ah, Xoolaha iyo Macdanta</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Xeerka shidaalka (patrolium Act)</li> <li>• Xeerka Macdanta (Miniral Act)s</li> </ul>
<b>8,</b>	<b>Guddiga Ilaaalinta Hantida Qaranka iyo Musuqmasuqa</b>

## **8. Waxqabadka Guddiyada Golaha**

### **Gudidda Joogtada iyo anshaxa.**

Guddigu iyadoo ka wakiila fasaxayada Golaha waxay intii fasaxa lagu jirey iyagoo la kulamay masuuliyiin qaran oo farbadan. Gudidda yagoo ka dulaysa wajibadkeda dastuurka iyo Xeer-Hoosadka Golaha muhiimadana sinayaa xilgudashada hawlaha Qaran Wasaaradaha iyo Ha'ayadaha Dawlada. waxay kulan xog-waran la yeelatay:-

- Wasaarada Hawlaha Guud Iyo Guryeynta Iyo Gadiidka.
- Guddomiyaha Baanka Dhexe.
- Taliyaha Ciidanka Booliska.

### **Waxa hawlo shaqo kulamadan kaga maqnaa:-**

- Wasaarada Arrimaha Dibedda
- Wasaarada Duulista iyo Hawada
- Wasaarada Arrrimaha Gudaha

### **Gudidda dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Miisaaniyada**

Sida shuruucda dalka ee Dastuurka, Xeerarka Maaliyada iyo Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiiladu dhigayo waxay Guddidu 29/12/2012 iyadoo Golaha uga Wakiilada wixii Maaliyadaha ku saabsan ay ka soo talo-bixisey Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2013ka, ka dib Kulamo iyo Xogwareysiyo ay layeelatay Hay'adaha miisaaniydu khuseysay sida Wasaarada Maaliyada oo soo Gudibisa.

intaa ka dib waxay Golaha Warbixin iyo talo-bixin ka soo siiyeen Miisaaniyada Qaranka sanadka 2013ka.



Waxa kale oo Guddidu Golaha u soo gudbisey, ka dib markey Kulan kala Yeeshen Wasiirka Wasaarada Duulista iyo Hawada iyo Saraakiil kale oo ka tirsan wasaaradaas si ay wax uga weydiiyan Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada, Markii Guddidu ka soo gudatey wajibaadkeedii, Warbixina ka siiyeen Golaha Xeerka Takaaliifta Aminga Madaarada

Waxaa kale oo Guddida Dhaqaalaha iyo Maaliyadu Golaha u soo Gudbisey Warbixina ka siisey Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore.

07/04/2013 Guddidu waxay ugu yeedhay oo Kulan saddex-geesooda wada yeesheen Wasiirka Maaliyada iyo Gudoomiyaha Baanka Dhexe JSL, iyagoo ka wada Hadley baaxadega Sarifka Lacagaha iyo Isbadalka markasta ku yimaada sidii wax looga qaban lahaa. Iyagoo 16/042013 markale isugu yimi kulan kale oo lagu sii falanqeynayay sidii wax looga qaban lahaa dhibtaas sarifka lacagaha iyo sidii loo kantarooli lahaa.

#### **Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabadgalyada.**

Guddida sida Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Goluhu awood ugu siiyey waxay Golaha u soo gudbiyeen warbixina ka soo siiyeen Xeerka Booliiska, Xeerkaas oo Goluhu ka doodey walinga aanu go'aan ka gaadhin, isla markaana Gudi gaara oo dib isugu soo habeysa loo saarey.

#### **Guddida Arrimaha Bulshada iyo Diinta**

Guddidu waxay Golaha ka soo talo-bixisey Wasiirka Wasaarada Dib-udejinta **Md. Saleeban Ciise Axmed (Xagla-toosiye)** oo ay soo jeedisey in loo ansixiyo Xilka Wasaaradaas ee Madaxweynuhu u Magacaabey, ka dibna Goluhu Cod aqlabiyad ah ku ansixiyey Wasiirka.

#### **Guddida Khayraadka Dabiiciga, Macdanta iyo Xoolaha Nool.**

Guddidu waxay Golaha ka soo talo-bixisey Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Macdanta, Biyaha iyo Tamarta **Md. C/salaam Maxamed Xasan** oo ay soo

jeedisey in loo ansixiyo Xilkaas Madaxweynuhu u Magacaabey, ka dibna Goluhu Cod aqlabiyad ah ku ansixiyey Wasiirka

### **Guddida Ilaalinta Hantida Qaranka iyo la dagaalanka Musuqa**

Guddidu waxay kulan hawleed la yeelatey Wasaarada Duulista iyo Hawada si ay wax uga waydiiso oo Wasaaradaasi Warbixin uga siiso lacagta \$10 ah ee Amniga Madaarada loo qaado, ka hor intii aanu Goluhu sharciiyeyn Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada lacagtaas sida loo qaado, waxyaabaha ay ku baxdo iyo Baahida keentay in la qaado.

### **Guddida Arrimaha Dibada, Iskaashiga iyo Qorsheynta Qaranka.**

Guddidu iyadoo Guddaneysa Waajibaadkeda sharcigu siiyay ee shaqada ay Golaha u qaabilsantahay waxay Golaha u soo gudbisey warbixina ka siisey Xeerka Statisticska, Xeerka oo Goluhu Ansixiyey una Gudbiyey Golaha Guurtida.

## **9. Wadatashiga Arimaha Deegaanka Green Caucus**

kooxda xildhibaanada ah ee loo yaqaan Kooxda Aragti Wadaagta Deegaanka (Green Cocos Team) kooxdan oo kawada tirsan dhamaan Guddiyada uu Goluhu ka koobanyahay hase yeeshee kamidaysan badbaadinta iyo ilaalinta deegaanka ayaa waxaa ay kormeer xaga deegaanka ah kusoo mareen dhul balaadhan oo ka kala tirsan Gobolada Togdheer, Saaxil iyo Awdal 09/03/2012 waxaanay kasoo aruuriyeen xog balaadhan oo ku saabsan deegaanka iyo xaalada dadku ku suganyihiinba, Xogtan Xildhibaanadu kasoo heleen deegaankaas oo ay ku dabakhi doonaan sadex Xeer oo Goluhu gacanta ku hayo gaar ahaan Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah, kuwaas oo kala ah:-

- ◆ National Environment Act (Xeerka Deegaanka ee Qaranka )
- ◆ Wildlife and Forestry Act (Xeerka kaymaha iyo Duurjoogta)
- ◆ Solid Waste Management Act (Xeerka Qashinka Adkaha ah)

### ***Gobolkasta inta meelood ay soo Mareen***

#### **Gobolka Togdheer:-**

- **Burco (Magaalo madaxda Gobolka Togdheer)**

Wersheda saabuunta (Ilays Detergent Incorporation)  
Wersheda Biyaha ee Maaxda (Togdheer Mineral Water)  
Xarumaha qashin qubka iyo  
Dawladda hoose ee burco

- **Degmada Oodweyne**



Ceel-bilcile  
Ceel-xume  
Jameecada caynaanshe  
Bali-mirawle (Xaaji diiriye)

- **Degmada Qoryaale**

Yasir

- **Degmada War-cimraan**

Qaloocan

### **Gobolka Saaxil:-**

- Berbera Malaala Madaxda Gobolka
- Abdaal
- Lafa-ruug
- Dara-godle
- Bulaxaar
- Xagal
- Laasciidle
- Sheekh
- Biyo-guure (biyo-kulule)

## **Kormeerka Caafimaadka Health Caucus**

### **Gobolka Awdal:-**

Waxaa kormeer ku saabsan u kuurgalida Xaalada Caafimaad ee Gobolka Awdal u baxay Koox Mudanayaal, kooxdaas oo soo kormeeray Xaalada Caafimaad ee Gobolku siduu yahay iyo Baahiyaha Caafimaad ee jira iminka waxayna soo kormeer Meelahan hoos ku qoran:-

- Borame Magaala madaxda Gobolka
- Degmada Dilla
- Camuud
- Qolujeed
- Boon

### **10. Safaradii Dibada:-**

Gudoomiye Ku-xigeenka 1<sup>aad</sup> **Md. Baashe Maxamed Faarax** ee Golaha Wakiilada Wafti balaadhan oo Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamud Siilaanyo** Hogaaminayo ayaa socdaal ugu baxay

Dalka UAE ee khaliijka Carabta, ka did martiqaad ay ka heleen dalkaas waxayna kulmeen Madaxda kala duwan ee dalkas iyo Masuuliyiinta Emadaha uu ka kooban yahay wadankaasi.

Sdoo kale wuxuu Gudoomiye Ku-xigeenka 1<sup>aad</sup> **Md. Baashe Maxamed Faarax** ka mid ahaa Waftigii uu hogaaminayay Madaxweynahu ee ka qaybgashay Shirkaa Turkiga ee Wadahadalada Somaliland iyo Somalia, shirkaas oo Dalka Turkigu Martigaliyay ayna ka soo baxeen 7 Qodob oo ay ku heshiiyeen isla markaana wada saxeexeen labada dal Somaliland iyo Somalia taariikhdu markay ahayd 13/04/2013



Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxman Maxamed C/laahi** ayaa Kulamo kala duwan la yeeshay Barlamana dalal ka tirsan Qaarada Yurub oo maalmihii ugu danbeysay Godoomiyuhu ku sugnaa, waxaa ka mida Gudoomiyahaasha Barlamana Dalaka **Sweden, Finland iyo Norway**, sidoo kale Wuxuu Gudoomiyuhu ka qeybgalay Kulan balaadhan oo Jaaliyada Dalka Ingriisku u sameysay Waftigii uu hogaaminayay Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamud Siilanyo**



Waxaa 23/04/2013 lagu soo dhoweeyey Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro)** aqalka Barlamaanka Dadlka ingiriiska ee Common House, halkasa oo ku qaabileen Mudanayaal ka tirasan aqalkasi oo ka mid yihiin **Mp. Stephen Doughty** oo lagu soo doorto Cardiff, **Mp. Rushanara Ali** oo laga soo doorto **Benthal Green and Bow** ee **Barriga London.**

Gudoomiyuhu Mahadnaqa qaabilaada ka dib wuxuu ka uga waramay xaalada Guud ee Somaliland wakhtigan ku sugan tahay, arrimaha siyaasada ee ugu danbeyey sida shirkii dhowaan ka dhacay dalka Turkiga ee Wada-hadalada Somaliland iyo Somalia, sidoo kale wuxuu warbixin ka siiyay Barlamaanka Somaliland.

Ugu danbeyn, waxay Mudanayaasha Barlamaanka ingiriiska ee uu la kulmay ay tilmaameen sida ay u daneynayaan arrimaha Somaliland iyo Geeska Afrika gaar ahaan wada-hadalada u socda Somaliland iyo Somalia.

## **11. Mudo Kordhin Cusub**

Golaha Wakiilada waxaa 15/04/2013 Golaha Guurtidu uu sameeyey Wakhti kordhin dheeraada ka dib markii wakhtigii hore loogu kordhiyay mudadiisu ku ekayd bilowga bisha 5aad, waxaana loo kordhiyay Mudo dhan 2 sano bil iyo 17 maalmood.

## **12. Mahadhooyin**

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 20<sup>aad</sup>**

Doorashooyinkii Golayaasha Deeganka ee dalka ka qabsoomey waxaa ku soo baxay 3 xisbi siyaasi oo Kala ah Kulmiye, Wadani iyo UCID waxaana meesha ka baxay Xisbigii UDUB sidaa darteed waxaa Mudanayaasha GOLuhu ku kala biireen 3 xisbi siyaasi ee cusub.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**

---

**Waaxda Hadal Qoraalka | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 20<sup>aad</sup>**